# Hay'adda SWDC waxay idin leedahay

## Soomaalaay Baadigoob Nabadda

Marka ugu horeysa Aduunka waxa ugu Qaalisan waxa weeye in Bulshaddu nabad ay ku wada noolaato, sidaa darteed waa maxay Nabadd? Goormaase la oran karaa waa la gaaray Nabad?

Hadaba Akhristayaal ayadoo ay tahay waxa kaliya ee aan u baahan nahay Nabad ayaa waxa ay yeelan kartaa micno badan, hase yeeshee waxa ay isagu soo Biyo shubanaysaa mida oranaysa waa in Dadweynaha ku nool Aduunka oo dhami, Isjeclaado, Sinaado, Iskana kaashado dhinaca Dhaqaalaha, Caafimaadka, Aqoonta iyo Farsamadda, iyaga oo aan loo kala soocin xaga Diinta, Midabka, Afafka i.w.m.




iyadoo micnaha guud ee Nabaddu sidaa yahay ayaa dalkayagu waxa uu ku caan baxay, Nabad iyo kala dambeyn la'aan mudo 20 sano ah, waxaana markasta abuurmo Qolyo isku sheega iney yihiin Hogaanka Bulshadda Soomaaliyeed, kuwaasoo shaqo ka dhigtey Bur-burinta Nabad iyo Nidaam ka hirgala gayiga Soomaaliyeed, Mab da'ay doonaanba hala yimaadeene.

Sidaa darteed Natiijada Nabad iyo Nidaam la'aanta ka jirtaa dalka gaar ahaan G/Koonfureed oo ay ugu horeyso Magaalda Caasimada Dalka ee Muqdisho waa tan ina baday in maalin qura oo uu gacan ka hadal dhexmaro dhinacyada isku haya siyaasada dalka ay Isbitaalada buuxiyaan dhaawac Boqolaal ah iyo dhimashada oo iyana maalintaasi gaarta ku dhowaad Boqol ama in ka badan oo isagu jira Caruur Haween iyo Dhalinyaro ku lug yeelata gacan ka hadalkaasi iyo kuwo aan ku shaqo lahayn intaba, iyadoo sidoo kalana dadka Maatada ah ay ku qasabta in ay u Barakacaan meel aan ku habooneeyn Deegaan iyagoo aanan haysan Cuno iyo Biyo ay ku noolaadaan.




Bal eeg gacan ka hadal iska sii socda oo aan lahayn u jeedo wax ku ool ah iyadoo maalin kaliya uu dhibaatada heerkan ah gaarsiiyay Ummadda Soomaaliyeed oo dhibaatooyinka dhinac waliboo nolosha ah ay haysato muddo labaatan sanno iyo wax ka badan .

Hadaba Akhristayaal Ummad walboo ku nool Dunidan waxey had iyo goor ku fikirtaa amaba ay ku howlan tahay qaabkii ay u hormarin lahayd islamarkaana ay dhibaatada uga samata bixin lahayd Dadkeeda iyo Dalkeediba, iyagoo uu mar waliba hadafkoodu yahay in ay ka hortagaan wax waliboo carqaladayn kara jiritaankooda Dal ahaaneed iyo Dad ahaaneed intaba.

Hase ahaatee sida aan ogsoonahay Akhristayaal Dadka Soomaaliyeed gaar ahaan kuwa ku nool Koonfurta Somalia oo ah Ummad in ku dhow 20 sano ku dhex nool Fowdo iyo Xasarado Colaad oo xili walbaa halkeedi ka aloolsan taasoo dhibaatooyin ku ah Nolosha iyo dib u dhac xaga la jaanqaadka Ummaddaha kalana u keentay Dadka iyo Dalka Soomaaliyeed ayaanan marnaba ka damqanaynin kooxaha iyagu babiska u haysta Hurinta colaada.

***Nabaddu waa khaali nimaan haysan waa Nuxuus***

Si kastoo ay ahaataba dhibaatooyinka laga dhaxlay dagaalada danaha gaarka laga leeyahay ee dadka Soomaaliyeedda ka hor istaagay baadi goobka Nabad waarta oo si dhab ah uga hirgashaa Gayiga Soomaaliyeed ayaa ah mida ugu weyni oo galaafatay nolosha dad badan oo haba yaraatee waxba aan galabsan, iyadoo dagaalkan iska sii socdana runtii isna sidaa soo kale ay waxyeeladiisu badan doonto hadii aan wax laga qaban.

Sidaa darteed Taariikhdu arin kastoo dhacdo wey xustaa waxeynu maqalnaa in dagaalo ay ka dhacaan Dalal ku yaalo Dunida hase yeeshee waxaa la helaa Yool ay beegsanayaan dadkaasi dagaalamaya taasoo suura galisa in inta badan la helo xalkii looga gudbi lahaa waxa dhacay.

Dadka Soomaaliyeed oo ah Ummad Khibrad badan ka haysata dhibaatooyinka laga dhaxlo dagaalada sokeeye ayaa wax la gudboon in dhinacyada dagaalka u dhaxeeya fikirka ka duwan qaataan kana fogaadaan faragalinta shisheeyaha ee Qadiyadda Soomaalida faraha kula jira mar walba, ogaadaana in shacbiga Soomaaliyeed ay yihiin dad leh Dal balaaran oo Deeq fara badan Alle ugu Deeqay iyo Diinta Sharafta badan ee Islaamka oo ay guud ahaanba ka midaysan yihiin, waxaase loo baahan yahay in Nabad iyo Nidaam lagu maareeyo hawlahooda, lana ilaaliyo sharafta dadka Soomaaliyeed si ay u suurtowdo in qof walba oo ah Muwaadin Soomaaliyeed uu helo Xuquuqda uu u leeyahay in dalkiisa ugu noolaado Nabad.

***Nabad la'aan waa Nolol la'aan***

waxeyna arintan ku imaan kartaa in la helo in qof kastoo Soomaali ah uu la yimaado dal jaceyl, dad jaceyl iyo ku Dhaqanka Shareecadda Islaamka oo si dhab ah loola yimaado, wixii dhacayna is niyad ah la isaga ilaawo, shisheeyaha faragalinta ka

wada arimaha Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed ee ku sugan gudaha iyo dibadda dalka la iska fogeeyo islamarkaana la ogaado waxyeelada uu ina la damacsan yahay Shisheeyuhu.

Hadaba si loo guto waajibaadka shaqsi kasta ka saaran ilaalinta Dadkiisa Dalkiisa iyo Diinta Islaamka waxaa lagama maarmaan ah in la helo iskaashi iyo wax wada qabsi dhexmara Bulsho weynta Soomaaliyeed, Sidaa darteed Soomaalida oo Rabi ku manaystay murtiyo ayaa waxay halbeeg uga dhigeen nolosha baniaadamka inay tahay mid ku taagan iskaashi sida ku cad Murtida oranaysa (Gacmo wada jirbey wax ku qabtaan) taasoo ay ka muuqato in wada jirku uu yahay arin inta badan dabooli karta hawlaha guud, waana taa tan loga baahan yahay Bulsho weynta Soomaaliyeed inay ku dabaqaan xal u helida Xasaradaha Colaada oo soo jiitamaysay mudada dheer, islamarkaana u istaagaan baadi goobka **NABADDA**.

**Waxaa iska Kaashadey Hayadda SWDC**

---

**Faain: SOMALITALK.COM**